

Helitaanka Isku-dheelitirnaanteenna

KA HORTAG SINBIRIXIDDA, KU-FIDDA IYO DHICIDDA

Dhiciddu waxay keeni kartaa Daawaca Maskaxda ee Qarracan.

Aqoonso oo meesha ka-saar khataraha guriga ka jira ee kordhiya halista dhicidda ama ku-fidda.

Kabaha

- Xiro kaboo raaxo leh, aan lagu sinbirixin, cagaha daboola, cidhib gaaban oo taageero leh kuwaas oo xarig lagu xidhi karo.

Sagxadaha dhulka

- Roogagga qaad oo dhuuji roogagga debecsan.
- Ka dhig meelaha lagu socdo meel aanan isku-dhexdaadsaneyn.
- Ku dheji xargaha iyo fiilooyinka derbiga.

Nalalka/Iftiinka

- Ku rakib nalalka dhaqdhaqaqa ku shaqeeya iyo/ama kuwa habeenkii guriga oo dhan si ay u bixiyaan iftiin ku filan dhammaan marinnda, hoolalka iyo jarjanjarooyinka.
- Daare-damiyeysaasha nalalka iyo laambadaha waa in ay fududahay in la gaaro.

Jaranjarooyinka


- Xir biraha gacmaha lagu qabsado ee debecsan ama kuwo cusub ku rakib jarjanjarooyinka labadooda dhinac.
- Hagaaji jarjanjarooyinka debecsan ama aanan sinnayn.
- Hubso marinka jarjanjarooyinka in ay iftiin wanaagsan leeyihiin.
- Ku dheji daare-damiyeysaasha xagga sare iyo xagga hoose ee jarjanjarooyinka.
- Ka dhig jarjanjarooyinka meel aan isku-dhexdaadsaneyn.
- Mari geeska sare ee jarjanjarooyinka midab ka duwan midabka jarjanjaraada inteeda kale si ay u sahlanaato in la arko.

Qolka Fadhiga / Qolka Jiifka / Jikada

- Isticmaal alaabada guriga oo fudud in laga galo ama laga soo baxo (dhererka jilibka ama ka dheer).
- Dib-u-habee qolalka si aad u sameyso meel lagu socdo oo bannaan.
- Agabka marar badan la isticmaalo dhig meel fudud in la gaaro.
- Telefoonka iyo tooshka/faynuusta dhigo miiska dhinac yaalla sariirta si ay kuugu sahlanaato in aad gaarto.
- Dhulka dhinacyadiisa oo dhan ka qaad waxyaabaha gogosha ah.

Musquusha

- Dhig roog aan lagu sinbirixin halka lagu qubeysto ama waaskada qubeyska.
- Ku rakib biraha derbiga ee la qabsado gudaha halka lagu qubeysto ama waaskada qubeyska iyo meel u dhow musquusha.
- Isticmaal kursiga qubeyska ama qalabka lagu qubeysto ee gacanta lagu qabsado.
- Isticmaal derin qubeys oo aan lagu sinbirixin ama koolo lagu dhejiyo waaskada qubeyska ama halka lagu qubeysto.
- Ku rakib nalalka habeenkii.



Iskaan-garee koodhkan QR si aad
wax badan u oggaato. ↓



Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah:

- [Kheyraadyada Dhaawaca Maskaxda ee Qarracan WA](#)
- [Isku-xirrada Nolosha Bulshada](#)
- [Dhiciddu/Ku-fidda Dadka Waaweyn | WA DOH](#)
- [Si Xoogan u Istaag WA | Ka-hortaggaa Dhiciddu/Kufidda Waayeellada](#)